**Xeerka L. 154 rep**

**Maalmaha fassax ah.**

## MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

## MAAMULAHA

Kadib marki la arkay sharciga lamba. 1301 ee 4 Nofember 1951 oo ansixinayaa Heshiiska Maamulida ee Dalka Somaliya ee hoos tegaaya Maamulka Talyaaniga kaas oo la siiyo fulinta guud ahaaneed.

Kadib markii la garoowsaday baahida loo qabo in la nidaamiyo maalmaha fassaxa ah ee dalka.

## WAXAA LA AMRAY

### Qod. 1

Waxaa la garoowsado in maalmaha fassax ay yihiin maalaha dabaldegga oo waqtigaasi ay reeban tahay in lagu dhaqaaqo howlaha sharci ah waxaana ka mid ah:

Maalin kasta ee Axadda ah:
1da Jannayo;
Maalinta Epifania;
Maaalinta Xuska S. Giuseppe;
1da aay – Maalinta xuska shaqada;
Maalinta Ascensione;
2 Juun – Maalinta asaaska Jamhuuriyadda Talyaaniga;
Maalinta Corpus Domini;
Maalinta Ciidda (dhammadka Ramadanka iyo 2 beri oo ku xigta);
Xeernidaamiyaha la xiriira ugaarsiga dalka Somaliya gudahiisa ee waqtigaan la joogo;
Maalinta dabaaldegga ee SS Pietro iyo Paolo;
Maalinta kowaad ee sanadka Somaliyeed;
Maalinta dabaaldegga Assunzione;
Maalinta Cidda ee Ciidul Adxa (Arafat iyo 2da beri oo ku xigta);
24 Oktoobar oo ah Maalinta Qaraamada Midoobe;
Maalinta Ognisanti;
Maalinta 4ta Nofeeebr ee maalinta Qarabada Midoobe;
21 Nofember ee dabaaldegga Somalida;
Maalinta dhalashada Nabigga Moxamed;
Maalinta dabaaldegga ee Immacolata Concezione;
Maalinta Natalaaha;
26ka Disember.

### Qod. 2

Howlaha Xafiisyada waxaa laga shaqeyn doona sacaado dhiman maalmaha halkan ku tilmaaman:

Jimca kasta;
11 Febraayo – Conciliazione;
Maalinta Bilowga sanadka Hajir;
10 Disember- Baaqa Xuuquqka Bani-Aaadmaka;

**Qod. 3**

Dabaal deegga 1 Maayo, oo ah maalinta shaqada, 2 Juun oo ah maalintii la as-aasay Jamhuuriyadda Talyaaniga, 24 Oktoobar, maalintii Qaramadda Madoobe, 21 Nofember oo ah feestada Somalia ee shaqaalaha hey'adaha caamka iyo hey'ada gaar loo leeyahay- oo sida la qabo lacagta la siin doono mushaar maalin markii lagu daro wax allaliyo wixii dheeraad ah.

Shaqaalaha lagu xusay faqradda sare oo shaqeynaya maalmaha Dabaaldeeg ah waxay heli doonaa mushaarkooda caadiga ah markii lagu daro warqadaha la siiyo muddada dheeradka ee shaqada la qabtay.

Dadka mushaarleyda ah ee shaqada muddoda dabaaldegga ah, kadib markii la siiyo mushaarka caadiga ah ee maalmeedka oo ay ka mid ah wixii dheerad ah ee shaqada dheeraad ah. Ciddi shaqeeya maalmaha dabaaldegga ah wuxuu xaq u yeelan doonaa mushaarkiisa maalin laha ee caadiga ah iyo lacag dheeraad ah ee maalmeed.

Muqdisho, 28 Disember 1951.

Maamulaha

**Fornari**